

Waa maxay xiiqdheer?

Xiiqdheer, sidoo kale loo yaqaano jix, waxaa keena bakteeriyo qofba qof hawada uga qaado. Calaamadaha qaar waxaa ka mid ah:



qufac



matag



neefsasho
dhib ah

Yaa aad ugu xanuunsan kara?

Dhallaanku aad bey ugu xanuunsan karaan xiiqdheerta. Walow ilmaha qaarkood qufacaan, ilmo badan ma qufacaan gebi ahaanba. Beddelka qufaca, waxaa laga yaabaa neeftu in ay dhibto.

Xiiqdheertu waxay keeni kartaa isbitaal-jiifin, oofwareen, dhaawac maskaxeed, ama xitaa dhimasho.



Maxaan sameyn karaa si aan nafteyda iyo kuwakale u ilaaliyo?

Public Health
Seattle & King County




Dadka da' kasta leh wey is-tallaali karaan si ay
naftooda iyo kuwakalaba u ilaaliyaan.



Dhallaanka iyo
caruurta yaryar

DTaP

2, 4, iyo 6 bilood
15-18 bilood
iyo 4-6 sano



Dhawr-iyo-toban
jirrada

Tdap

11-12 sano



Haweenka
uurka leh

Tdap

Saddexda bilood
ee ugu dambaysa
ee uur kasta



Dadka jira 19+

Tdap

Waqti kasta kuwa
aan weligood
qaadan

Sidee baa tallaaliiddo u difaacdaa ilmaha uurka ku jira?



Markaad is-tallaasho, jirkaagu wuxuu sameeyaa jir-difaacyo loo gudbiyo ilmahaaga. Jir-difaacyadu waxay ilaaliyaan ilmahaaga dhawrka bilood ee ugu horreeya noolashooda.

Hadaad uur leedahay, qaado tallaal waqti hore inta lagu jiro saddexda bilood ee ugu dambeeya uurka. Hadaad qufac la xanuunsan tahay, ha booqan dhallaan ama dad uur leh.

Xaggee baan macluumaad dheeri ah ka heli karaa?

Dhaqtarkaaga kala hadal tallaal qaadashada. Dhaqtar u baahan? La xiriir Community Health Access Program adoo wacaya 1-800-756-5437 ama iimeel-gareynaya CHAP@kingcounty.gov.

Si aad wax badan uga ogaatid xiiqdheerta, booqo:

bit.ly/kcpertussis

